

FoodShare



WISCONSIN

A Recipe for Good Health



Faa'iidooyinka Ku meel gaarka FoodShare

TRANSITIONAL FOODSHARE BENEFITS

Waa maxay Faa'iidooyinka Ku meel gaarka FoodShare?

Faa'iidooyinka Ku meel gaarka FoodShare waa faa'idooyin ku meelgaar ah oo xubnaha FoodShare oo ka tagayo barnaamijka Ku Wisconsin Works (W-2) ama Tribal Temporary Assistance for Needy Families (Caawinta Ku meel gaarka Qabiilka ee qoysaska Baahan), ee loo yaqaan sida Tribal TANF. Faa'iidooyinka Ku meel gaarka FoodShare oo soconeyso shan bilood.

Sidee ayaan u helaa faa'iidooyinka ku meel gaarka ah ee FoodShare?

Si loo helo faa'idooyinka ku meel gaarka FoodShare, xubinta qoyskaaga FoodShare waa inay haystaan:

- Ka qeybqaatay W-2 heerka lacag bixinta ama Tribal TANF.
- Ka aad ugu yaraan hal lacag bixin kaash ah ka bilow W-2 ama Tribal TANF.
- Leeyahay faa'iidooyinka FoodShare ee bisha faa'iidooyinka ku meel gaarka FoodShare waa la go'aansaday, iyo W-2 ama lacag bixinta Tribal TANF sidoo kale waxaa loo sameeyay isla bishaas.

Looma baahno inaad codsatid faa'iidooyinka ku meel gaarka FoodShare. Wakiilkaaga ayaa arkeyso haddii aad heli kartid faa'iidooyinka ku meel gaarka FoodShare marka aad buuxisid sharciyada barnaamijka. Haddii aad heli kartid faa'iidooyinka ku meel gaarka FoodShare, waxaad heleysaa warqad ku sheegeyso inta tirada faa'idadaada

FoodShare ay tahay, iyo faa'iidooyinka waxaa la gelinayaa kaarkaaga QUEST.

Imisa ayaan helayaa?

Tirooyinka faa'idada ku meel gaarka FoodShare wuxuu ku saleysanyahay cabirka qoyskaaga, daqliga, iyo qarashaadka ee bisha ka horeyso lacag bixinta ugu dambaysay W-2 ama Tribal TANF. Tirada lacag bixintaada ugu dambaysay W-2 ama Tribal TANF lama isticmaalo marka la ogaanayo tirada faa'iidooyinka ku meel gaarka FoodShare waxaad heleysaa. Haddii aad qabtid wax isbeddelo ah ee daqliga shaqada ah, taageerada carruurta, ama isha kale ee dhacdo inta lagu jiro ama kadib bisha lacag bixinta ugu dambaysay W-2 ama Tribal TANF, oo aan sidoo kale la isticmaaleynin.

Miyay isbadeleysaa tirada faa'idadeyda ku meel gaarka ee FoodShare?

Tirada faa'idadaada waxay ahaaneysaa isku midka muddada faa'idada shan bilood illaa qof ku jiro qoyskaaga:

- Ku biiraa FoodShare qoyska kala duwan.
- Ka guuro qoyskaaga oo ku isticmaalaa FoodShare iqtiyaarkooda.

Haddii wax walba ee kore dhacdo, hay'adaada deegaanka waxay ogaanayaan tirada faa'idada cusub. Tirada faa'idada cusub waxay ku saleysnaaneysaa isbadelada cabirka qoyska, daqliga, iyo qarashaadka. Tirada faa'idadaan xun

waxay ahaaneysaa isku midka ee inta ka hartay muddada faa'idada shanta bilood.

Haddii hay'adaada deegaanka wax ka barato isbadelada kale ee adiga kaa imaanayo, qof ku jiro qoyskaaga, ama barnaamij kale, tirada faa'idada ku meel gaarka FoodShare isma daleyso illaa adiga ama qof ku jiro qoyskaaga ku weydiiyo faa'iidooyinka FoodShare.

Miyaan u baahannahay inaan soo wargeliyo isbadelada?

Adiga iyo qoyskaaga loogama baahno inay soo wargeliyaan isbeddelo walba iyaga oo helayo faa'iidooyinka ku meel gaarka FoodShare.

Miyaan codsan karaa faa'iidooyinka joogtada ah ee FoodShare?

Haddii qoyskaaga uu helayo faa'iidooyinka ku meel gaarka FoodShare, waxaad codsan kartaa faa'iidooyinka joogtada ah ee FoodShare waqti walba. Haddii cabirka qoyskaaga kordhaa, daqligaaga hoos ayuu aadaa, ama qarashaadka hoygaaga kor ayuu aadaa, qoyskaaga wuxuu heli karaa faa'idooyin badan oo ay la jirto FoodShare joogtada ah. Haddii faa'idooyinkaaga joogtada ah ee FoodShare ay ka yartahay tirada faa'idooyinkaaga ku meel gaarka FoodShare, qoyskaaga wuxuu dooran karaa inuu joogteeyo helitaanka faa'iidooyinka ku meel gaarka FoodShare.

Sidee ayaan ku helaa faa'iidooyinka joogtada FoodShare kadib markay dhammaato faa'iidooyinka FoodShare?

Si loo helo faa'iidooyinka joogtada ah FoodShare kadib faa'idooyinkaaga ku meel gaarka FoodShare ee shan bilood markay dhammaato, waa inaad buuxisaa cusbooneysiinta FoodShare, oo ay ku jiraan wareysiga. Qoyskaaga wuxuu ka helayaa warqad ku saabsan buuxinta cusbooneysiinta qiyaastii 45 maalmood ka hor dhammaadka muddadaada shanta bilood. Si aad uga fogaatid booska bannaan ee faa'iidooyinka FoodShare, cusbooneysiintaada waa in la buuxiyaa inta lagu jiro bisha ugu dambeyso ee qoyskaaga helaa faa'iidooyinka ku meel gaarka FoodShare. Haddii

qoyskaaga doortaa inuusan codsan FoodShare joogtada ah, faa'idooyinkaaga FoodShare way dhammaanaysaa.

Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Haddii aad u maleysay inaad heli kartid faa'iidooyinka FoodShare ama haddii aad qabtid su'aala kale, la soo xiriir hay'adaada deegaanka. Si aad u heshid hay'adaada, booqo www.dhs.wisconsin.gov/forwardhealth/imagency/index.htm, ama ka soo wac Adeegyada Xubinta 1-800-362-3002. (TTY iyo adeegyada ku meel gaarka waa la heli karaa.)

BAYAANKA USDA EE TAKOOR LA'AANTA

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka naafo ka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta:

<https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay, iyada oo la wacayo (833) 620-1071, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

(1) boostada:

Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama

(2) fakiska:

(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama

(3) iimaylka:

FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.

